

# Shaki ma kaaga jiraa in oggolaasho lagu siin doono?

Muddada ay soomaalidu sugaan in ay Waaxda agaasinka ajnebigu (UDI) wareysato weli way dheer tahay, warbixin intan ka badan ka eeg bogga [www.udি.no](http://www.udি.no). Wareysiga kaddib ayay UDI ka baaraandegaysaa codsigaaga. Magangelyadoonayaasha Soomaaliya ka yimid ee ay da'doodu ka weyn tahay 18 sano 60 % ayaa codsigoodi magangelyada diidmo laga siiyay 2015-ka.

Muddada codsiga laga baaraandegayo way dheer tahay haddii aad codsato in qoyskaaga halkan laguu keeno. Mana codsan kartid adiga oo aan oggolaasho joogitaan Norway ka helin.

Markii aad doonto ayaad codsan kartaa in lagaa caawiyo in aad ku laabato dalkaagi hooyo ama dal kale oo aad ku leedahay oggolaasho joogitaan.

Kaalmo dhaqaale ayaa lagu siin karaa haddii aad IOM ka codsato in lagaa caawiyo sidii aad ku laaban lahayd. IOM kala xiriir 23 10 53 20 iyo [www.iom.no](http://www.iom.no).